



Qorshaha Gargaarka Wareegidda

Waxaannu kaa caawin karnaa in aad telefishinkaaga ka dhigto dijital haddii aad:

- Tahay 75 jir ama ka weyn tahay, ama
- Ku soo noolayd hoy daryeel muddo lix bilood ah ama in ka badan, ama
- Qaadato (ama qaadan karto) kaalmooyinka naafonimada qaarkood, ama
- Qoran tahay qof indha la' ama arag naaqusan.

Waxaa gargaar laga heli karaa u wareegidda telefishinka dijital ah

Telefishinnada Ingiriiska oo dhan waxaa laga dhigayaa dijital dhawaanna seenyaalihii hore ee telefishinka, ee analogga ahaa waa laga demin doonaa xaafaddaada. Haddii aadan haysan telefishin dijital ah waqtiga wareegidda, waxaa kaa lumi doona adeeggaaga telefishinka. Laakiin ma aha in aad walwasho. Qorshaha Gargaarka Wareegidda (Switchover Help Scheme) ayaa diyaar u ah in lagugu caawiyo.

Maxaa lagu qabtaa Qorshaha Gargaarka Wareegidda?

Waxaannu dadka u qalma ka caawinnaa in ay telefishinnadooda midkood ka dhigaan dijital. Haddii aad u qalanto, waxaannu telefishinka dijital ah kuugu macnayn doonnaa si cad oo fudud. Waxaannu kuu sheegi doonnaa dhammaan fursadaha kuu diyaar ah. Waxaannu gurigaaga ku rakibi karnaa waxa aad u baahan tahay. Waxaan hubin doonnaa in aad ku faraxsan tahay sida uu gebi ahaan u shaqaynayo.

Switchover Help Scheme: Somali



Sideen u ogaan karaa haddii aan telefshinka dijital ah haysto?

Haddii aad telefshinnadaada midkood ku daawan karto idaacado tiradoodu shan ka badan tahay, waxay u badan tahay in aad iminka haysato telefshinka dijital ah. Haddii kale, waxaad u baahan kartaa gargaarkayaga. Waxaannu kuu fududayn doonnaa in aad telefshinkaaga dijital ka dhigto umana baahan doontidba in aad telefshinkaaga beddesho.

Miyaan u qalmaa?

Waxaannu ku caawin karnaa haddii aad:

- Tahay 75 jir ama ka weyn tahay, ama
- Ku soo noolayd hoy daryeel muddo lix bilood ah ama in ka badan, ama
- Qaadato (ama qaadan karto):
 - Gunnada naafo ku noolaanta (Disability living allowance), ama
 - Gunnadada daryeelka (attendance) ama daryeelka joogtada ah (constant attendance), ama
 - Siyaadada dhaqdhaqaaqa loogu talagalay (Mobility supplement), ama
- Qoran tahay qof indha la' ama arag naaqusan.

Miyaa lacag la iga qaadi doonaa?

Waxaannu ku weydiin doonnaa in aad **£40 ka bixiso adeegga caadiga ah, oo ka kooban:**

- Qalabka isticmaalkiisu fudud yahay ee daboolaya baahiyahaaga
- Gargaar lagaa siiyo rakibidda qalabka

Switchover Help Scheme: Somali



- Rakibidda saxan-gacmeed ama anteenno, marka aannu karayno, haddii loo baahan yahay si uu qalabka cusub u shaqeeyo
- Ku tusidda sida qalabku u shaqeeyo iyo qof aad wici karto si aad gargaar u hesho inta aad qalabka la qabsanayso.

Adeeggani waa **bilaash** haddii aad qaadato gunnada togan ee hawlgabka (pension credit), taageerada dakhliga (income support) ama gunnada shaqo raadsadaha ee dakhliga ku salaysan (income-based jobseeker's allowance).

Waxaa jira fursado kale oo kharash dheeraad ah leh, kuwaasoo aannu kuu macnayn karno.

Maxaan iminka samaynayaa?

Haddii aad u qalanto Qorshaha Gargaarka Wareegidda, warqad ayaannu waqti fiican kuu soo diri doonnaa si aannu kuu weydiinno haddii aad gargaarkayaga rabto.

Waa in aad haysato laysin telefihin oo la adeegsan karo (bilaash ah haddii aad 75 jir ka weyn tahay) si aad gargaar u hesho.

Ma garanaysaa qof kaloo gargaar u baahan?

Waxaa laga yaabaa in aad leedahay saaxiibbo ama qaraabo ama waxaa jiri kara qof bulshada xaafaddaada ka mid ah oo u baahan doona in gargaar laga siiyo wareegidda. Haddii ay sidaas tahay, fadlan warbixintan iyaga u gudbi.

Switchover Help Scheme: Somali



Haddii aad warbixintan ugu baahan tahay nuskhad kale sida far waaweyn, Akhris Fudud (Easy Read), cajalad dhegeysi ama farta Braille ee dadka indhaha la', ama luqad kale, fadlan bilaash u soo wac lambarka **0800 40 85 900**.

Haddii maqalka ay dhibaato kaa haysato ama uu hadalku kugu adag yahay, waxaad adeeggayaga telefoonka qoraalka ee bilaashka ah kala soo xiriiri kartaa lambarka **0800 40 85 936**.

Qorshaha Gargaarka Wareegidda waxaa maamusha BBC-da, iyadoo adeegsanaysa heshiis ay la gashay Dawladda. Waxaannu caawinnaa dadka waayeelka ah iyo kuwa naafaysan ee ay ku adkaan karto u wareegidda telefishinka dijital ah.

Qorshaha Gargaarka Wareegidda waxaa maamusha shirkadda eaga plc, oo matalaysa shirkadda DSHS Limited, eaga House, Archbold Terrace, Newcastle upon Tyne, NE2 1DB. Lambarka diiwaangelinta shirkadda 3858865.

Si aad warbixin dheeraad ah u hesho, bilaash nooga soo wac lambarka **0800 40 85 900** ama booqo **helpscheme.co.uk**
Waxay khadadku furan yihiin 8da subaxnimo ilaa 9ka habeenimo, 7 maalmood toddobaadkii.